
# Macluumaad ku saabsan adeegyada dadka cusub ee Helsinki

## Adeegyada bulshada, caafimaadka iyo gurmadka degdegga ah



# Mawduucyada



- Adeegyada gaarka ah ee loogu talagalay dadka cusub
- Adeegyada caafimaadka maskaxda ee dadka cusub
- Hay'adda diiwaangelinta dadka iyo xogta dhijitaalka ah (Digi- ja väestötietovirasto)
- Kela – Hay'adda daryeelka bulshada ee Finland
- Kaarka aqoonsiga iyo oggolaanshaha deggenaanshaha
- Koonto bangi iyo macluumaadka amaahda (luottotiedot)
- Nidaamka macluumaadka macaamiisha iyo Maisa
- Gaadiidka dadweynaha ee HSL
- Daryeelka caafimaadka afka iyo ilkaha
- Adeegyada caafimaadka
- Dugsiyada xannaanada iyo waxbarashada
- Xiriiriyeyaasha muhiimka ah

# Adeegyada gaarka ah ee loogu talagalay dadka cusub



Kuvitukset: Lille Santanen

# Adeegyada bulshada ee taageera is-dhexgalka




- Marka aad la xiriirto adeegyada, la sameynayaa qiimeyn baahiyahaaga iyo qorshe kugu habboon: Maxaad uga baahantahay caawimaad nolol maalmeedkaaga? Waa maxay xaaladdaada nololeed?



- Qorshahaaga wuxuu ka koobnaan karaa la-talin shaqsiyeed ama kooxeed, waxqabadyo kale iyo macluumaad kaa caawinaya is-dhexgalka bulshada.
- Waxaan xooga saarnaa in aad adigu si madaxbannaan ugu dadaasho xallinta arrimahaaga iyo ka qayb qaadashada bulshada. Tusaale ahaan, waa inaad isku daydaa buuxinta foomamka la xiriira adeegyada. Waan ku taageereynaa, laakiin annagu ma qaban karno wax walba adiga kugu saabsan.



- Waxaan bixinnaa hagitaan iyo talo bixin la xiriirta arrimaha nolol maalmeedka sida guri helidda, lacagaha, socdaalka iyo xaaladaada deggenaanshaha.




- Dhammaan adeegyadayadu waa lacag la'aan.
- Haddii loo baahdo, adeegyada waxaa lagu heli karaa turjubaan. Dhammaan shaqaalaha iyo turjumaannadu waa kuwo ku shaqeeya sir hayn (qaanuun ahaan).

# Maxay yihiin caawimada iyo taageerada aad heli karto?

- **Taageerada caafimaadka maskaxda iyo nolol maalmeedka:** Dhammaan shaqaalaheennu waxay kaa caawinayaan caafimaadka maskaxda iyo horumarinta xirfadahaaga si aad ugu noolaato nolol wanaagsan.
- **Taageerada qoyska:** Waan ku caawinaynaa haddii aad la kulantay dhibaatooyin qoyskaaga ka dhex jira, waxaana kuu tilmaamaynaa adeegyada kugu habboon.
- **Baahiyaha gaarka ah:** Haddii aad leedahay baahi gaar ah, sida naafonimo ama daryeelka waayeelka, waxaan kuu tilmaamaynaa adeegyada ku habboon.
- **Caawinta xaaladaha degdegga ah:** Shaqaalaha adeegyada bulshada (sosiaalityöntekijä) iyo hagayaasha bulshadu (sosiaaliohjaaja) waxay kaa caawinayaan xaaladaha degdegga ah iyo adeegyada muhiimka ah.
- **Taageero dhaqaale:** Kela ayaa bixinaysa taageerada dhaqaale ee aasaasiga ah. Haddii aad u baahan tahay gargaar degdeg ah, waxaad ka codsan kartaa adeegyada dadka cusub kaalmada dheeraadka ah ama kaalmada kahortagga dhibaatooyinka dhaqaale. Waxa kale oo lagaa caawinayaa qorsheynta xaaladaada dhaqaale.



Helsinki

# Kooxaha kala duwan ee ka shaqeeya adeegyada

Shaqaalaha bulshada

Hagayaasha bulshada

Dhaqtarada cilminafsiga

Dhaqaatiirta iyo daaweeyayaasha jimicsiga

Kooxda caafimaadka dhimirka ee dadka cusub

dhaqtar dhimirka iyo kalkaaliso caafimaad dhimirka

Kooxda caafimaadka

dhaqtar iyo kalkaaliso caafimaad

# Telefoonka talo-bixinta

**09 3103 7577**

Isniinta ilaa Jimcaha
Saacadaha: 8:15 – 16:00

- Waxaan caawinnaa dhammaan dadka u baahan taageero.



Helsinki

# Xarunta talo-bixinta

- Kalasataman THK, Työpajankatu 14A
- Isniinta ilaa Jimcaha
- Saacadaha: 8:15 – 15:45
- Dabaqa 1aad, Qolka 1001

- Sugitaanka: Lambarka sugitaanka
- Turjubaan ayaa la heli karaa haddii loo baahdo







# Raac shaashadda si aad u aragto lambarkaaga sugitaanka

Lambarka sugitaanka

Qolka aad galeyso




Helsinki

# Adeegyada xarunta talo-bixinta

**Waxaad ka sameyn kartaa:**

- Codsashada adeegyada iyo xubinimada
- Helidda talo-bixin guud
- Dhiibista codsiyada kaalmada dhaqaale ee dheeraadka ah ama kahortagga dhibaatooyinka dhaqaale
- Dhiibista codsi xiriir ah oo loogu talagalay shaqaalahaaga
- La-kulanka shaqaale sugitaan degdeg ah

**Kama sameyn kartid:**

- Buuxinta codsiyada kale sida codsiyada Kela ama codsiyada oggolaanshaha deggenaanshaha ee la xiriira Maahanmuuttovirasto
- Go’aamada laguma sameeyo xarunta talo-bixinta



Helsinki

# Waajibaadka asturnaanta iyo sir haynta

- Shaqaalaha caafimaadka iyo adeega bulshada waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan sirta macluumaadka ay la tacaalayaan, waana sharci Finland ka jira.
- Macluumaadka ku jira diiwaanka bukaanka ama macaamilka looma gudbin karo cid kale.
- Shaqaalaha ma shaacin karaan wax macluumaad ah oo ay ku heleen shaqadooda la xiriirta adeegyada caafimaadka ama bulshada.
- Waajibaadka asturnaanta waa mid ballaaran, macluumaadka lama shaacin karo xitaa haddii la helay si aan toos ahayn.
- Waajibaadkani wuu sii jiraa xitaa marka shaqaalaha uu ka tago shaqadiisii hore.


Laki terveydenhuollon ammattihenkilöistä (559/1994)

Laki sosiaalihuollon ammattihenkilöistä (817/2015)

Laki potilaan asemasta ja oikeuksista (785/1992)

Laki sosiaalihuollon asiakkaan asemasta ja oikeuksista (812/2000)

Helsinki




# Doorka turjumaanka

- Haddii loo baahdo, waxaan u diyaarin karnaa turjumaan kulankaaga.
- Turjumaanku wuu imaan karaa goobta ama wuxuu ka shaqeyn karaa meel fog (telefoonka ama internetka).
- Macaamilka wuxuu codsan karaa turjumaan leh lahjad gaar ah, jinsi gaar ah, ama turjumid telefoon.
- Turjumaanadu waa kuwo dhexdhexaad ah, waana waajib inay ilaaliyaan sirta macluumaadka. Waxay turjumayaan wax walba iyada oo aan la kordhin ama laga dhimin.
- Carruurta, qoyska iyo saaxiibbada looma isticmaalo turjumaan ahaan.

# Wakiil ka noqoshada arrimaha macaamilka

- Wakiil ka noqoshada waxay ka dhigan tahay in qof kale uu kuu maareeyo arrimahaaga.
- Dadka kale ee wakiil ka noqon kara waa:
  - Waalidiinta ilmaha ka yar 18 jirka ah.
  - Carruurta waaweyn ama qaraabada kale ee loo oggolaaday inay wakiil uga noqdaan waalidkood da' ah.
  - Wakiil sharci ah (Edunvalvoja).
- Wakiilnimada dhijitaalka ah waxaa lagu diiwaangelinayaa Suomi.fi, qofka wakiilka ah wuxuu helayaa xuquuq uu ku maamulo arrimaha qofka kale, wuxuuna xaddidayaa muddada wakiilnimada.
  - Henkilön puolesta asiointi - Suomi.fi

# Wada Macaamil (Kanssa-asiointi)

- Qofka kaa caawinaya wuxuu ku taageerayaa howshaada, laakiin adiga ayaa si toos ah uga qayb qaadanaya go'aan qaadashada.
- Taageeradan waxaa loo isticmaali karaa marka macaamilka uu u baahan yahay caawimo sababtoo ah aqoonta luqadda ama adag-naanta nidaamka adeegyada.
- Qofka kaa caawinaya wuxuu gacan ka geysan karaa buuxinta foomamka ama sharraxaadda waraaqaha rasmiga ah, laakiin macaamilka ayaa isagu go'aan ka gaaraya arrimaha iyo saxiixyada.

Helsinki




Helsinki Partners / N2 Albiino

# Caafimaadka Maskaxda

> Caafimaadka maskaxdu waa xaalad qofku dareemayo in uu awood u leeyahay inuu la tacaalo dhibaatooyinka nololeed, shaqeeyo, iyo ka qeybqaato hawlaha bulshada.

(WHO 2013)



# Taageero wanaagga

- Dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda lagama xishoodo, waana muhiim in laga hadlo.
- Waxaad heli kartaa caawimo dhanka caafimaadka maskaxda ah oo ay bixiyaan:
  - Dhakhaatiirta cilminafsiga (Psykologit)
  - Dhaqaatiirta jimicsiga iyo daweynta (Fysioterapeutit)
  - Dhaqaatiirta hawlaha nololeed (Toimintaterapeutit)

- La hadal shaqaalahaaga si aad u hesho caawimo.

Helsinki

# Shirar gaar ah iyo kooxo



Waxaad la kulmi kartaa shaqaalaha kaligaa ama koox ahaan.



Dhakhtar cilminafsiga iyo shaqaale bulshadu waxay sameeyaan qiimeyn qoyska oo dhan loogu talagalay.



Waxaad ka qeyb gali kartaa barnaamijka "Waalidnimo Finland", oo loogu talagalay waalidiinta.

Helsinki


# kooxda la yiraahdo waalid ku ahaanshaha Finland gudaheeda

- Kooxdu waxaa ay isu imaanaysaa afar goor.
- Mawaadiicda looga hadlaayo kulammadaas waxaa ay kala yihiin:
    - Adeegyada ay magaalada Helsinki ugu taloggashay qoysaska carruurta leh
    - Xuquuqda carruurta iyo waalidka
    - Korriinka iyo nololwanaagga ilmaha, iyo sidoo kale sharciyada barbaarinta ee taageerada u noqonaaya xiriir wanaagsan oo dhexmara waalidka iyo ilmaha
    - Ku koritaanka laba dhaqan dhexdooda
    - Nololwanaagga qoyska
- Kulammada waxaa nala jooga turjubaan leh xirfadda wax turjumista
- Waxaa jira oo la bixin doonaa qaxwe, shaah iyo cunto fudud oo gows qabsi ah.
- Ka mid ahaanshaha kooxda waa lacag la'aan ama bilaash



Helsinki

# Dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda



- Dhacdooyin adag ama waayo-aragnimo xanuun badan
- Isbedello nololeed oo waaweyn
- Dhibaatooyinka la qabsashada nolol cusub
- Hurdo la’aan iyo daal badan
- Dhibaatooyin xagga xusuusta iyo feejignaanta
- Dhibaatooyin waxbarasho
- Murugo iyo niyad jab
- Walwal, culeys iyo stress
- Dhibaatooyin xiriirka bulshada
- Walwalka xagga qoyska iyo saaxiibbada
- Dhibaatooyin la xiriira isticmaalka mukhaadaraadka ama khamaarka
- Dareen kalinimo iyo go’doon

Helsinki

# Khadka gurmadka ee ururka Mieli



[MIELI Kriisipuhelin 09 2525 0111](https://mieli.fi/kriisipuhelin)




Helsinki

## Instagram:
## Maahan muuttaneiden erityispalvelut Helsinki

**Facebook:**
**Maahan muuttaneiden erityispalvelut Helsinki**

Helsinki



Kuva: DVV

# Digi- ja väestötietovirasto

Xafiiska Diiwaangelinta Dadweynaha iyo Macluumaadka Dhijitaalka ah

Helsinki

# Diiwaangelinta Deganaanshaha (Kotikuntamerkintä)

DIGI- JA VÄESTÖTIETO-VIRASTO

- Qof kasta oo si rasmi ah uga degan Finland wuxuu leeyahay degmo rasmi ah (kotikunta).
- Degmadu waxay ku xiran tahay meesha uu qofku degan yahay.
- Qof kasta oo dibadda uga yimid Finland waa inuu si gaar ah u codsadaa degmo rasmi ah.
- Codsiga waxaa loo diraa Xafiiska Diiwaangelinta Dadweynaha iyo Macluumaadka Dhijitaalka ah, waxaana qaadan karta toddobaadyo.

  - Buuxi foomka codsiga lambarka aqoonsiga (henkilötunnus).
  - Buuxi codsiga diiwaangelinta deganaanshaha.
  - Ballan u qabo xaqiijinta aqoonsigaaga.

Helsinki

# Faa’iidooyinka Diiwaangelinta Deganaanshaha

DIGI- JA VÄESTÖTIETO-VIRASTO

- Waxaad codsan kartaa kaarka aqoonsiga (henkilökortti).
- Waxaad furan kartaa xisaab bangi.
  - Bangiyada qaar waxay codsan karaan turjubaan rasmi ah inta lagu jiro furitaanka xisaabta.
- Waxaad heli kartaa aqoonsi dhijitaal ah oo kuu oggolaanaya inaad gasho adeegyada internetka.
- Waxaad isticmaali kartaa dhammaan adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee dadweynaha.
- Waxay xaq kuu siinaysaa waxbarashada qasabka ah ee carruurta da'doodu tahay 6-18 sano.
- Waxaad heli kartaa xanaanada carruurta (päivähoito).

Kuva: Kela, mediapankki



# Kela – Hay'adda Damaanad Qaadka Bulshada ee Finland

Helsinki

# Kela waxay ka shaqeysaa damaanad qaadka bulshada

- Kela waxay damaanad qaadaysaa nidaamka bulshada ee Finland, waxayna bixisaa kaalmada dhaqaale ee xaalado kala duwan.
- Damaanad qaadkani wuxuu xaqiijiyaa nolol ku filan marka uu qofku waayo shaqo, xanuunsado, noqdo naafado, gaboobo, dhalo ilmo ama waayo masuulkiisa.
- Kaalmada la bixiyo waxaa lagu go'aamiyaa sharciga.
- Tusaale ahaan, kaalmada Kela waxaa ka mid ah:
  - Lacagta carruurta (lapsilisä)
  - Xirmada hooyada (äitiyspakkaus)
  - Kaalmada guryaha (asumisen tuet)
  - Kaalmada dadka shaqo la'aanta ah (työttömyysetuudet)
  - Kaalmada nololeed (toimeentulotuki)

Helsinki

# Kaarka Kela (Kela-kortti)




- Marka aad kaarka Kela ku soo bandhigto farmashiyada iyo xarumaha caafimaadka ee gaarka loo leeyahay, waxaa si toos ah lagaa dhimaa lacagta Kela daboolayso, adiguna waxaad bixinaysaa inta aad iska leedahay.
- Xuquuqda adeegyada caafimaadka dadweynaha waxay ku salaysan tahay diiwaangelintaada ee Xafiiska Diiwaangelinta Dadweynaha iyo Macluumaadka Dhijitaalka ah.
- Xarumaha caafimaadka dadweynaha badankood waxay weydiiyaan kaarka Kela si loo xaqiijiyo aqoonsiga, laakiin waxaad heli kartaa adeegyada caafimaadka dadweynaha xitaa haddii aadan haysan kaarka Kela.

# Sida loo maareeyo arrimaha la xiriira Kela

Kela

### Telefoonka:

[Wac xafiiska Kela]

### Internetka:

[Ku maaree arrimahaaga adeegga dhijitaalka ah ee OmaKela]

Kela

### Xafiiska Kela:


[Booqo xafiiska Kela adiga oo goobta tegeysa]

Helsinki

# Adeegyada Kela ee luqado kale

- Muut kielet | Henkilöasiakkaat | Kela
- Kela waxay adeeg bixisaa afafka Finnishka, Iswidishka, Ingiriiska iyo Saamiga. Waxa kale oo aad adeegyada Kela ku maareyn kartaa adiga oo turjubaan adeegsanaya.
- Xafiisyada Kela badankood waxay bixiyaan turjubaanno telefoon loogu yeero (pikatulkkaus). Looma baahna in la sii ballansado, waxaana la heli karaa turjubaan isla markiiba iyadoo loo marayo taleefan ama tablet. Turjubaanka degdegga ah wuxuu ku habboon yahay su'aalaha gaaban.
- Haddii loo baahdo, shaqaalaha Kela waxay kuu qaban karaan ballan telefon la xiriir ah oo turjubaan ku jiro.
- Turjubaanka Kela adiga wax lacag ah uguma baxayo, laakin turjubaanka waxaa bixin kara oo kaliya Kela haddii loo arko inuu loo baahan yahay. Ma awoodid inaad si gaar ah u codsato turjubaan.

Jussi Hellsten



# Kaarka Aqoonsiga & Ogolaanshaha Deganaanshaha

Helsinki

# Kaarka Aqoonsiga ee Ajaanibta

- Si aad u hesho kaarka aqoonsiga, waa inaad leedahay diiwaangelinta degmada iyo ogolaanshaha deganaanshaha.
- Booliiska ayaa bixiya kaarka aqoonsiga.
- Sida loo dalbado kaarka aqoonsiga.
    - Carruurta looma baahna kaarka aqoonsiga.
    - Haddii kaarka aqoonsiga kaa lumo ama lagaa xado, waa inaad booliiska u gudbisaa diiwaangelin denbi.
- Kaarka aqoonsiga waxaa lagu bixiyaa inta ay shaqeyso ogolaanshaha deganaanshaha ama kaarka deganaanshaha.
- Kaarka aqoonsiga ee ajaanibta looma isticmaali karo safarrada caalamiga ah.
- Marka aad dibadda safreyso, waxaa muhiim ah inaad wadataa kaarka aqoonsiga, kaarka deganaanshaha iyo baasaboorka.



# Ogolaanshaha Deganaanshaha

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

- Waa inaad ogaataa goorta ogolaanshahaaga deganaansho dhacayo.
- Waa inaad ogaataa sababta lagu siiyay ogolaanshaha deganaansho.
- U cusboonaysii ogolaanshaha deganaanshaha iyo dokumentiyada safarka waqti hore, ugu yaraan 3 bilood ka hor inta uusan dhicin.

- Oleskelulupatyypit | Maahanmuuttovirasto

Helsinki

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

# Kaarka Ogolaanshaha Deganaanshaha

1. Nooca ogolaanshaha deganaanshaha

3. Lambarka macmiilka

4. Xaqa aad u leedahay inaad shaqeyso




2. Muddada uu shaqeynayo

5. Lambarka aqoonsiga shakhsi ahaaneed

# Sida Loo Codsado Ogolaanshaha Deganaanshaha



- Codsashada ogolaanshaha deganaanshaha | Maahanmuuttovirasto
- Ogolaanshaha deganaanshaha ee ugu horreeya | Maahanmuuttovirasto
- Waxaad codsan kartaa ogolaanshaha deganaanshaha adigoo isticmaalaya warqad codsi ah ama adeegga dhijitaalka ah ee Enter Finland.
- Ballan ka sameyso xafiiska Hay'adda Socdaalka si aad is-diiwaangeliso.
- Cusboonaysiinta ogolaanshaha deganaanshaha waa in la dalbado ugu yaraan 3 bilood ka hor inta uusan dhicin.
- ogolaanshaha joogitaanka la dheereeyey | Maahanmuuttovirasto

# Dukumentiyada Safarka

- Caadiyan waa inaad haysato baasaboor sax ah markaad Finland soo gashayso ama joogaysid.
- Noocyada dukumentiyada safarka:
    - Baasaboorka qaranka
    - Baasaaboorka qaxootiga
    - Baasaaboorka dadka aan haysan jinsiyad rasmi ah (muukalaispassi)







- [Matkustusasiakirjat | Maahanmuuttovirasto]
- [Pakolaisen matkustusasiakirja]
- [Muukalaispassi]

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

Helsinki

**Waxaad kaalmada maaliyadeed uga heli kartaa Kela codsashada cusboonaysiinta ogolaanshaha deganaanshaha iyo dukumentiyada safarka.**

**Cusboonaysiinta baasaboorka qaranka laguma taageero Kela.**



# Dib u Midaynta Qoyska

- Dib u midaynta qoyska | Maahanmuuttovirasto – Tilmaamo luqado kala duwan ah.
  Sida loo codsado ogolaanshaha deganaanshaha sabab la xiriirta qoyska – Webinar.
- Finland, qof qoyska ka tirsan waxaa loola jeedaa waalidka (hooyo iyo aabbe) iyo carruurta ka yar 18 jir.
- Codsaduhu waa qofka dibadda jooga ee codsanaya inuu Finland yimaado.
- Qofka xubin qoyska ah (perheenkokoaja) waa qofka degan Finland ee uu codsaduhu la midoobayo.
- Haddii aad heshay ilaalinta caalamiga ah, waxaad codsan kartaa dib u midaynta qoyska adigoon buuxin shuruudaha dakhliga 3 bilood gudahood markii laguu oggolaaday deganaanshaha.
- Hubi xilliga dhabta ah iyo faahfaahinta Hay'adda Socdaalka Finland.
- Toimeentuloedellytys





# Xisaabta Bangiga iyo Xogta Amaahda

Helsinki

# Xisaabta Bangiga iyo Aqoonsiga Elektrooniga ah

- Furitaanka xisaab bangi waxaa laga yaabaa in laguugu baahdo turjubaan rasmi ah oo goobta jooga.
- Lambarka xisaabta cusub waa la ogeysiin karaa Kela iyo shaqaalahaaga bulshada.
- Waxaad heli kartaa aqoonsiga dhijitaalka ah ee xooggan, haddii aad haysato diiwaangelinta degmada, kaarka aqoonsiga, iyo lambar aqoonsi shakhsi ahaaneed.
- Aqoonsiga elektrooniga ah waxaa loo isticmaalaa in si dhijitaal ah lagu xaqiijiyo qofka isticmaala adeegyada.
- Waxaad isticmaali kartaa:
  - OmaKela
  - OmaVero
  - OmaKanta



# Xogta Amaahda (Luottotiedot)

- Xogta amaahda waa macluumaad kaydsan oo muujinaya xaaladda dhaqaale ee qofka iyo taariikhda bixinta lacagaha.
- Bangiyada iyo shirkadaha waxay xogtan u isticmaalaan inay qiimeeyaan haddii aad awood u leedahay bixinta heshiisyada maaliyadeed.
- Ka fogaaw haddii qof uu kugu dhiirrigeliyo inuu iibsado xogtaada amaahda ama uu kuu sameeyo lacag bixinta qeyb-qeybta ah.
- Finland, xog xumida la xiriirta amaahda waxay saamayn kartaa fursadahaaga, sida iibinta ama kiraynta guri.
- Ha bixin macluumaadkaaga bangiga (erayga sirta ah ama magaca isticmaale) qofna.
- Ha gelin xogtaada bangiga bogag aan rasmi ahayn.

Helsinki

Kuva: HUS



# Nidaamka Xogta Macaamiisha iyo Maisa

# Nidaamka Xogta Macaamiisha

- Adeegyada bulshada ee magaalada Helsinki waxay isticmaalaan nidaamka Apotti si loo diiwaangeliyo macluumaadka.
- Sharciga daryeelka bulshada iyo sharciyada kale ee la xiriira waxay qeexayaan macluumaadka la diiwaangelinayo.
- Maisa waa mareeg elektroonik ah oo isku xira daryeelka bulshada iyo caafimaadka, si aad ugu maareyso adeegyadaada wakhti kasta iyo meel kasta.
- Waxaad ka dhex arki kartaa xogtaada daryeelka bulshada, sida go’aamada iyo qorshayaasha.

maisa

Download on the App Store

GET IT ON Google Play

Nordea

- Sida loo isticmaalo Maisa
- Soo degso Maisa
- Gal akoonkaaga adoo isticmaalaya aqoonsiga elektrooniga ah (verkkopankkitunnukset)
- Luuqadaha lagu isticmaali karo: Finnish, Swedish, English
- Website: Maisa.fi
    - Haddii loo baahdo, isticmaal turjumaan online ah marka aad isticmaaleyso mareegaha.

# Adeegyada laga heli karo Maisa


1 • Ballan-qaadasho (Ajanvaraukset)

2 • Liiska adeegyada
  - Diiwaangelinta deeqaha dhaqaale (Täydentävä toimeentulotuki)

3 • Dawooyinka (Lääkkeet)

4 • Farriimaha (Viestit):
  - Shaqaalaha bulshada (Sosiaalityöntekijä)
  - Xarunta caafimaadka (Terveysasema)









# HSL – Gaadiidka dadweynaha


# Helsingin seudun liikenne

- **Helsingin seudun liikenne** (HSL) waa nidaamka gaadiidka dadweynaha ee ka shaqeeya magaalada Helsinki iyo nawaaxigeeda. Waxaad ku safri kartaa baska, tareenka, metro-ga iyo taraamka.
- Waxaa jira afar aag oo lagu magacaabo **A, B, C iyo D**, kuwaasoo u kala baxa masaafo ahaan laga bilaabo bartamaha Helsinki.
- Tigidhka safarka waxaad ka iibsan kartaa HSL-applikeeshinka, kaarka safarka (matkakortti), mashiinnada tigidhada ama goobaha iibka.











Helsinki

HSL HRT

# Fiidiyowga tilmaamaya sida loo isticmaalo HSL-applikeeshinka.

[Linkki ohjevideoon]




Helsinki

# Ganaaxa kormeerka

- Ganaaxa kormeerka waa 100 yuuro.
- App-ka HSL waa in tikidhka uu ku jiro taleefankaaga ka hor intaadan raacin baska, taramka, tareenka xaafadaha ama gelin aagga lacag-bixinta metroga.
- Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan ganaaxa kormeerka, waxaad la xiriiri kartaa adeegga macaamiisha ee HSL ama aad booqan kartaa xafiiskooda adeegga ee.
- Arrimaha la xiriira ururinta lacagaha, amarada maxkamadda ama qorsheynta deynta: perinta@hsl.fi.



100 €

# Adeegyada daryeelka caafimaadka afka



Helsinki

# Daryeelka ilkaha ee Magaalada Helsinki



Waxaad booqan kartaa dhammaan rugaha caafimaadka ilkaha ee magaalada Helsinki.



Waxaad ballan ka qabsan kartaa rugta caafimaadka ilkaha haddii aad leedahay lambarka aqoonsiga shakhsiyeed.



Wac si aad u ballansato:

**09 310 51400**

(wac, ka dibna waxaa laguu soo celinayaa)

Helsinki

## Adeegga degdegga ah maalmaha shaqada saacadaha 7.00–14.00

**09 310 51400**

**Kalasataman hammashoitola**
**Työpajankatu 14 A**

## Adeegga degdegga ah fiidkii iyo maalmaha fasaxa

**09 471 71110**


**Puistosairaala**
**Stenbäckinkatu 11**

→ Had iyo jeer wac ka hor intaadan tagin adeegga degdegga ah.


→ Waxaad heli kartaa adeeg degdeg ah xitaa ka hor intaadan helin lambarka aqoonsiga.

Helsinki

# Lacag bixinta adeegyada ilkaha



Daryeelka ilkaha ee dadka waaweyn waa lacag.



Daryeelka ilkaha ee carruurta waa bilaash.




Biilku wuxuu gurigaaga ugu imaan doonaa boosto ahaan.

# Daryeelka ilkaha ee guriga

- Waxa ugu muhiimsan waa in si wanaagsan loo daryeelo ilkaha guriga.
- Ha siin carruurta sonkor badan.

- Ilmaha ka yar 10 sano wuxuu baran karaa in uu iskiis u cadayo, laakiin waa in qof weyn si fiican u cadayo ilkihiisa.

Esite somaliksi



Helsinki

# Adeegyada caafimaadka

# Xarunta caafimaadka waa meesha ugu horreysa ee lagu helo daryeel

- Isniin ilaa Jimce
- Saacadaha: 8:00–16:00
- Terveysasemat | Magaalada Helsinki

Xaruntaada caafimaad fiiri.


Helsinki



Kuva: Virpi Velin

# Ballansashada

- Adigoo wacaya (lagaa soo wacayo dib)
- Ama adigoo si toos ah u tagaya xarunta caafimaadka.




Waxaad xaq u leedahay turjubaan ama shaqaale ku hadla luqaddaada.





Kuva: Marek Sabogal

# Adeegga degdegga ah fiidkii, habeenkii iyo maalmaha fasaxa:




**Uusi Lastensairaala**
Stenbäckinkatu 9
Carruurta ka yar 16 sano.



**Malmin sairaala**
Talvelantie 6




**Haartmanin sairaala**
Haartmaninkatu 4,
rakennus 12

Helsinki

## Caawinta adeegga degdegga (päivystysapu):
## 116117 / 24h
## – xaaladaha degdegga ah

## Talo caafimaad (terveysneuvonta):
## 09 310 10023 / 24h
## – xaaladaha aan degdegga ahayn

# Xaaladaha degdegga ah (hätätilanteet):

- Wac lambarka gurmadka oo keliya haddii nafta, caafimaadka, hantida ama deegaanka uu halis ku jiro.
- Lambarka gurmadka ee Finland waa: 112.
- Lambar kan waxaa lagala xiriiri karaa booliiska, dab-demiska iyo ambalaaska.
- Turjubaan ayaa la heli karaa.
- Adeeggu waa bilaash 24/7, waana la wici karaa xitaa haddii aadan lahayn lacag taleefanka.

**112**




Waxaad sidoo kale kala soo degi kartaa barnaamijka mobilka: **112 Suomi.**

Helsinki

# Adeegsiga adeegyada caafimaadka 1/2

Booqashada xarunta caafimaadka waa bilaash.

€ Adeegyada degdegga ah iyo daryeelka gaarka ah waa lacag.

biil ayaa guriga laguu soo diri doonaa.

Qaado warbixinadii hore ee caafimaadkaaga marka aad tagayso.

Helsinki

# Adeegsiga adeegyada caafimaadka 2/2

Haddii aad rabto in aad ballanta kansasho, samee ugu dambeyn maalinta ka horreysa ballanta saacaddu markay tahay 12:00

Haddii aadan kansalin ballanta, waxaa laga qaadi karaa ganaax: **56,70** euroa.

Tag ballantaada wakhti!




Qaado Kela-korttisi

Helsinki

# Daryeelka caafimaadkaaga (oma terveys):

Hurdada iyo maaraynta walbahaarka





Jimicsi





D-vitamiin

Nafaqo



Helsinki

# Hagista adeegyada xanaanooyinka iyo waxbarashada hore

- Waxaad ka heli kartaa caawimo buuxinta codsiyada xanaanada iyo waxbarashada hore.
- Waxaa lagugu siinayaa macluumaad ku saabsan codsiyada aad hore u dirtay.
- Waa lagu caawin karaa turjubaan haddii loo baahdo.
- Varhaiskasvatuksen ja esiopetuksen palveluohjaus

- Xogta la xiriirka:
  - 09 310 80488 (Isniin–Jimce, 9–15)
  - varepalveluohjaus@hel.fi (Isfinnish, Ingiriisi, Iswidish)



Helsinki

# La-talinta waxbarashada iyo daryeelka carruurta

- Kasvatuksen ja koulutuksen palveluneuvonta
- La-talinta waxay bixisaa macluumaad guud oo ku saabsan daryeelka carruurta iyo waxbarashada: xanaanada, iskuulada iyo waxbarashada sare.
- Uma baahnid inaad leedahay adeegsi rasmi ah.
- Waxaa lagu caawin karaa turjubaan.

- **Xogta la xiriirka:**
    - 09 310 44986 (Isniin–Jimce, 10–12 iyo 13–15)
    - Työpajankatu 8, 00580 Helsinki (10–12 iyo 13–15)
    - koulutusneuvonta@hel.fi



Helsinki

# Xiriiryo faa'iido leh

Adeegyada gaarka ah ee loogu talagalay dadka cusub ee dalka yimid

InfoFinland

THL – Caafimaadka maskaxda ee dadka soo guuray

Helsinki